DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES

# Horumarinta Manhaj Waxbarasho oo Macno Leh Barnaamijyada Daryeelka Carruurta ee Qoyska: Tilmaamaha Ka-qaybgalaha

8 Saacadood

Cusbooneysiintii ugu dambeysay Juun 2026

Dhamaan agabka lagu sameeyay maalgelinta Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota, Adeegyada Daryeelka Carruurta waxaa xuquuqdooda leh oo lagu ilaaliyay Pub. L. No. 94-553, 90 Stat. 2541.

**Xuquuqaha daabacaadda iyo Xaddidaadaha Isticmaalka iyo Mas'uuliyadda**

Dhamaan manhajyada ay samaysay Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota, Adeegyada Daryeelka Carruurta, waxaa lagu sameeyay maalgelin dadweyne. Xuquuqda daabacaadda waa la ilaaliyaa, sidaas darteedna lama soo saari karo, lama beddeli karo, lama koobiyeyn karo, lama iibin karo, ama si kale looma qaybin karo iyada oo aan la helin **ogolaansho qoraal** ah oo ka timid Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota. Haddii ay adeegsadaan hay'ado kale oo tababar bixiya, *Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska iyo Adeegyada Daryeelka Caruurta* waa in lagu tilmaamaa inay tahay milkiilaha manhajka. Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota ma bixiso wax dammaanad ah mana aqbasho wax mas'uuliyad ah oo ku aaddan isticmaalkeeda ama natiijooyinkeeda.

Si aad u codsato oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir: DCYF.Child.Care@state.mn.us

# Guudmarka Qaybta 1

## Aagga Mawduuca KCF:

KCF Area II.A: Abuurista Khibrado Waxbarasho oo Wanaagsan

## Qaybta Nuxurka CDA:

Qaybta Mawduuca II: Tallaabooyinka Lagu Horumarinayo Korriinka Jidheed iyo Garashada Carruurta

## Qeexitaanka Koorsada:

Aqoonsiga xeeladaha hagaya barayaasha si ay u qorsheeyaan una hirgeliyaan manhaj waxbarasho oo macno leh, kuna habboon barnaamijyada daryeelka carruurta ee qoysaska. Naqshadaynta deegaanno waxbarasho oo dabacsan iyo adeegsiga hababka waxbaridda ee buuxinaya baahiyaha bartayaasha kala duwan ee barnaamijyada carruurta da'aha isku dhafan. Horumarinta nidaamyo wax-ku-ool ah oo taageera qiimayn dhab ah iyo ka-qaybgalka qoysaska, si loo qorsheeyo manhaj ka tarjumaya danaha, baahiyaha, awoodaha, asalka dhaqameed, iyo yoolalka gaarka ah ee carruurta. Hirgelinta waayo-aragnimooyin waxbarasho oo macno leh oo kobciya xiisaha iyo ka-qaybgalka carruurta, isla markaana abuura jacayl joogto ah oo ay u qabaan waxbarashada inta ay nool yihiin.

## Ujeedooyinka Waxbarashada:

Dhammaadka casharkan, ka-qaybgalayaasha si firfircoon uga qaybqaatay waxay awoodi doonaan inay:

- Aqoonsiga aragtiyaha waxbarasho iyo falsafadaha waxbaridda ee hagaya manhajka barnaamijyada daryeelka carruurta ee qoysaska.
- Go'aaminta hababka deegaanka loogu dhex dari karo manhajka, si loo taageero danaha carruurta, korriinkooda, iyo yoolalkooda waxbarasho.

## Qorshaha Casharka:

| Qaybta | Waqtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah |
|---|---|---|
| **A** | 20 daqiiqo | Soo-dhaweyn/Hordhac, Yoolalka |
| **B** | 40 daqiiqo | Aqoonsiga Aragtiyaha Waxbarashada iyo Falsafadaha Waxbaridda |
| **C** | 20 daqiiqo | Naqshadaynta Deegaanno Tayo Sare Leh oo Daryeelka Carruurta ee Qoyska ah |
| **D** | 30 daqiiqo | Isku darka Manhajka iyo Deegaanka Waxbarashada |
| **E** | 10 daqiiqo | Dib u Eegista/Xidhitaanka Ujeeddooyinka |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | |

## Qeexidda Manhajka ee Daryeelka Carruurta ee Qoyska

Manhajku wuxuu hagitaan ka bixiyaa waxa iyo sida loo baro carruurta yaryar. “Waxa” uu manhajku ka kooban yahay waxaa ka mid ah nuxurka, aqoonta, xirfadaha, iyo dabeecadaha ay carruurtu ku bartaan dhammaan dhinacyada korriinkooda. “Sida” waxaa loola jeedaa waayo-aragnimada waxbarasho, hababka waxbaridda, iyo is-dhexgalka aad adeegsato si aad u taageerto waxbarashada carruurta, iyo deegaanka aad ku hirgeliso dhammaan arrimahaas.

Manhaj si buuxda loo hirgeliyey wuxuu ka kooban yahay:

- Deegaanno si ula kac ah loo qorsheeyey, siyaasado, jadwallo, iyo habraacyo joogto ah oo loo dejiyey iyadoo la tixgelinayo korriinka, waxbarashada, iyo fayo-qabka carruurta.
- Nidaamyo loogu talagalay indho-indhaynta, diiwaangelinta, qiimaynta, iyo qorshaynta si loo taageero horumarka carruurta.
- Hababka isgaarsiinta iyo ka-qaybgalka qoysaska ee dhiirrigeliya iskaashi iyo wada-shaqayn dhex marta qoysaska iyo barayaasha.
- Dib u-eegis, qiimayn, iyo dejinta yoolal joogto ah si loo horumariyo hababka waxbaridda loona waafajiyo baahiyaha isbeddelaya ee carruurta.

### Dhaqan-gelinta Dhabta ah: – Bayaanka Falsafadda

Ka fiirso aaminsanaanta aasaasiga ah, qiyamka, hab-dhaqannada, iyo habka waxbarasho ee ka kooban manhajkaaga. Sidee ayaad u qeexi lahayd falsafadda waxbarasho ee barnaamijkaaga?  Qor bayaan kooban oo qeexaya falsafaddaada waxbarasho.

### Dib u milicsiga Deegaannada Waxbarasho ee Tayo Sare Leh

Deegaannada daryeelka carruurta ee qoyska waa inay ahaadaan kuwo “soo dhaweyn leh oo raaxo leh, lehna agab iyo qalab ku filan oo carruurta ku dhiirrigeliya inay xiisahooda siyaabo kala duwan u muujiyaan, isla markaana taageera hawlahooda dhammaan dhinacyada korriinka” (NAFCC, 2026).

- Maxaa ka dhigaya deegaanka daryeelka carruurta ee qoyskaaga mid soo dhaweyn leh, raaxo leh, isla markaana carruurta soo jiita oo ka qaybgelintooda dhiirrigeliya?
- Waa maxay doorashooyinka qorshaysan ee aad samaysay si aad u abuurto deegaan waxbarasho oo tayo sare leh?

- Waa maxay yoolalka aad ka leedahay xoojinta iyo horumarinta deegaankaaga waxbarasho?

### Isku darka Manhajka iyo Deegaanka Waxbarashada

Deegaan kasta oo waxbarasho wuxuu ka tarjumayaa sheeko u gaar ah oo ku saabsan baahiyaha carruurta, waxyaabaha ay jecel yihiin, waxa ay xiiseeyaan, iyo awoodaha ay u leeyihiin inay wax qabtaan. Ka fiirso barnaamijkaaga. Sidee ayuu u dhiirrigeliyaa waxbarashada? Maxay carruurta baraysaa? Qor saddex hab oo deegaankaaga waxbarasho uu u dhiirrigeliyo waxbarashada.

1.

2.

3.

### Qorshaynta Yoolalka Waxbarasho ee Carruurta

Ka fikir carruurta ku jirta barnaamijkaaga. Waa maxay hawlaha ay carruurtu si joogto ah ugu celceliyaan? Ma jiraan dabeecado ay carruurtu si joogto ah u sameeyaan oo aad marar badan dib ugu hagto si aad u hubiso badbaadadooda?

- Dooro hal tusaale, kadibna qor waxa aad aaminsan tahay in carruurtu isku dayayaan inay ka bartaan hawshaas ama dabeecaddaas.

- Qayb hoosaadyada ECIPs ee aad ku aragto in hawshan lagu aqoonsaday waa kuwee?

- Waa maxay agab, hawlo, ama waayo-aragnimooyin waxbarasho oo aad deegaanka ku dari karto si ay u taageeraan yoolalka waxbarasho ee carruurta?

## Shaqada

Qor fikradahaaga adigoo ka jawaabaya su’aasha ah: “Sheeko noocee ah ayuu deegaankaaga waxbarasho ka warramayaa?”

## Guudmarka Qaybta 2aad

### Ujeedooyinka Waxbarashada:

Dhammaadka casharkan, ka-qaybgalayaasha si firfircoon uga qaybqaatay waxay awoodi doonaan inay:

- Hirgelinta nidaamyo wax ku ool ah oo lagu indho-indheeyo, lagu diiwaangeliyo, lagu qiimeeyo, laguna qorsheeyo horumarka joogtada ah ee korriinka carruurta.
- Sharax faa'iidooyinka iyo xeeladaha lagu darayo qoysaska habka qiimaynta dhabta ah ee carruurta.

### Qorshaha Koorsada:

| Qaybta | Waqtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah |
|---|---|---|
| **A** | 10 daqiiqo | Soo dhawayn/Ujeedooyinka<br>Dib u eegista shaqada goobta |
| **B** | 20 daqiiqo | Wareegga Qiimaynta Dhabta ahi Wuxuu Taageeraa Waxbarashada |
| **C** | 50 daqiiqo | Horumarinta Nidaamyo Wax ku-ool ah oo Lagu Sameeyo Qiimayn Dhab ah |
| **D** | 30 daqiiqo | Ka-qaybgelinta Qoysaska ee Qiimaynta Dhabta ah |
| **E** | 10 daqiiqo | Dib u Eegista/Xidhitaanka Ujeeddooyinka |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | |

## Wareegga Qiimaynta Dhabta ahi Wuxuu Taageeraa Waxbarashada

Qiimaynta dhabta ahi waa hab joogto ah oo ku dhisan u fiirsashada, is weydiinta, iyo diiwaangelinta waxa aad maalin kasta ku aragto carruurta oo samaynaya. Waxay si dabiici ah u dhacdaa marka barayaashu ay kormeeraan, la falgalaan, oo ay u fiirsadaan carruurta inta ay ciyaarayaan. Marka barayaashu si ula kac ah uga qaybqaataan habka qiimaynta dhabta ah, waxay ururiyaan oo ka jawaabaan xogta ay ka helaan u fiirsashada, diiwaangelinta, iyo dib u milicsiga, si ay u qorsheeyaan manhaj waxbarasho oo macno leh.

### La waafajinta Manhajka Baahiyaha Carruurta

Ka fikir hal cunug oo ku jira barnaamijkaaga. Sidee ayaad u waafajisaa manhajka, oo ay ku jiraan deegaanka, qalabka, agabka, iyo waayo-aragnimada waxbarasho, si ay ugu habboonaadaan baahiyaha gaarka ah ee waxbarasho iyo korriin ee ilmaha? Jawaabahaaga ku qor meelaha loogu talagalay.

- Baahiyaha gaarka ah ee ilmaha, sida heerka korriinkiisa, habka uu ugu fudud yahay

waxbarashada, asalka dhaqameed iyo luqadeed, iyo wax-ka-beddellada ama taageerada uu u baahan yahay.

- Waxyaabaha uu ilmuhu xiiseeyo, oo ay ka mid yihiin hawlaha uu jecel yahay, maaddooyinka uu xiiseeyo, waxyaabaha uu doorbido, dadka uu jecel yahay inuu la falgalo, agabka, ama alaabta ay carruurtu ku ciyaaraan.

- Dabeecadda iyo shakhsiyadda ilmaha, oo ay ka mid yihiin heerka uu ugu baahan yahay ku-tiirsanaan ama uu u madax-bannaan yahay, heerka firfircoonidiisa, iyo sida uu uga falceliyo ama uga jawaabo xaaladaha, dhibaatooyin, khataraha, iyo dhiirrigelinta.

- Awoodaha ilmaha, oo ay ka mid yihiin xirfadaha, aqoonta, iyo kartidiisa isgaarsiineed, dhaqdhaqaaqeed, garasho, shucuureed, iyo guud ahaan heerarka korriinkiisa.

## Taageeridda Qiimaynta Dhabta ah ee Daryeelka Carruurta ee Qoyska: Qaybaha iyo Hawlaha

| Qaybta Qiimaynta | Hawlaha Wareegga | Tallaabooyinka Taageerada |
|---|---|---|
| La socoshada iyo Diiwaangelinta | | |
| Qiimayn | | |
| Qorshaynta | | |

## Horumarinta Nidaam Shaqaynaya: 3 Hadafyada

Maxaad hadda si wanaagsan uga qabanaysaa barnaamijkaaga? Waa maxay fikradaha cusub ee aad jeclaan lahayd inaad hirgeliso si aad barnaamijkaaga uga horumariso nidaam qiimayn oo shaqaynaya oo dhab ahaan ku salaysan xaaladda waxbarashada? Qor hal yool oo ku saabsan qayb kasta.

- La socoshada iyo Diwaangelinta
- Qiimayn
- Qorshaynta

## Ku Daridda Qoysaska Hannaanka Qiimaynta Dhabta ah

Aqoonso laba hab oo qoysasku uga qayb qaadan karaan wareegga qiimaynta dhabta ah.

| | |
|---|---|
| La socoshada | |
| Qorista | |
| Dib u milicsiga | |
| Qorshaynta | |

### Dib u milicsiga

Waa maxay tallaabooyinka aad qaadi doonto si aad u hubiso in xogta qiimaynta qoysaska loola wadaago si macno leh, isla markaana loo hubiyo inay helaan fursado ay kaga qayb qaataan dejinta yoolalka iyo go'aan ka gaarista arrimaha la xiriira ilmahooda? Samee hal yool oo aad ka hirgelin doonto barnaamijkaaga.

## Hawlaha Shaqada Goobta

Samee wareeg qiimayn oo kooban adigoo u kuurgalaya ilmo ku hawlan waxqabad inta lagu jiro ciyaarta. Diiwaangeli waxa ilmuhu sheegayo iyo waxa uu samaynayo. Ka fiirso oo qiimee waxa aad ka baratay u kuurgalkaaga.

Waydii naftaada:

- Maxuu ilmuhu baranayaa?
- Waa maxay qaybta korriinka ilmaha ee ay tani ka tarjumayso?
- Maxay dhacdadani kuu sheegaysaa oo ku saabsan baahiyaha, danaha, ama awoodaha ilmaha?

Sharax hawl lagu sii horumarinayo barashada ilmaha.

## Guudmarka Qaybta 3aad

### Ujeedooyinka Waxbarashada:

Dhammaadka casharkan, ka-qaybgalayaasha si firfircoon uga qaybqaatay waxay awoodi doonaan inay:

- Sharax xeeladaha lagu mideynayo kormeerka, badbaadada, iyo qorshaynta manhajka ee ka jawaabaya baahiyaha carruurta, si loo taageero waxbarashadooda iyo korriinkooda barnaamijyada daryeelka carruurta qoyska.
- Qorshee waayoaragnimo waxbarasho oo ku habboon carruurta da'aha kala duwan, adigoo adeegsanaya hababka manhajka ka dhasha baahiyaha iyo xiisaha carruurta, si loo taageero danahooda gaarka ah, awoodahooda, iyo yoolalkooda korriineed.

### Qorshaha Koorsada:

| Qaybta | Waqtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah |
|---|---|---|
| **A** | 20 daqiiqo | Soo Dhawaynta/Hordhacyada<br>Dib-u-eegista Ujeedooyinka |
| **B** | 20 daqiiqo | Isku-darka Kormeerka iyo Badbaadada ee Qorshaynta Manhajka |
| **C** | 45 daqiiqo | Qorshaynta Carruurta Da'aha Kala Duwan Iyadoo la Adeegsanayo Manhajka Ka Dhasha Baahiyaha Carruurta |
| **D** | 25 daqiiqo | Hagidda Barashada Carruurta Iyadoo la Adeegsanayo Goobaha Xiisaha |
| **E** | 10 daqiiqo | Dib u Eegista/Xidhitaanka Ujeeddooyinka |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | |

## Qorshaynta Manhajka Carruurta Da'aha Kala Duwan

Qorshaynta manhaj waxbarasho oo macno leh oo loogu talagalay carruurta da'aha kala duwan waxay diiradda saartaa in qorshaynta lagu saleeyo korriinka carruurta. Halkan waxaa ku yaal dhowr talooyin oo waxtar leh oo ku saabsan qorshaynta waxbarashada carruurta da'aha kala duwan:

- U adeegso macluumaadka laga helay u kuurgalka iyo qiimaynta si uu u hago qorshaynta.
- Dooro agabka, hawlaha, iyo habaynta deegaanka iyadoo lagu salaynayo danaha carruurta iyo xirfadaha ay soo korayaan.
- U waafaji hawlaha waxbarashada baahiyaha korriineed ee dhammaan carruurta ku jira barnaamijka, oo ay ku jiraan dhallaanka, carruurta yaryar, carruurta xannaanada, iyo carruurta da'da dugsiga.

- U aqoonsado hawlaha iyo jadwalka maalinlaha ah inay yihiin fursado waxbarasho oo qiimo leh, kana faa'iidayso waqtiyadan si aad ugu kuurgasho, u qiimayso, una taageerto korriinka carruurta inta lagu jiro maalinta.
- Tixraac ECIPyada si aad u aqoonsato fikradaha, aqoonta, iyo xirfadaha ku habboon carruurta da'aha kala duwan.

## Hawlaha Qorshaynta Manhajka

Qorshee hal hawl oo loogu talagalay koox kasta oo da' ah, adigoo adeegsanaya hal goob oo xiise. Aqoonso qaybta waxbarashada, qayb hoosaadka, iyo tilmaamaha ay hawshu ka tarjumayso.

| Qaybta Da'da | Hawlaha Waxbarashada | Qaybta Waxbarashada | Qayb-hoosaadka | Tilmaame |
|---|---|---|---|---|
| Ilmaha Socod Baradka | Ku shubidda iyo daadinta biyaha iyadoo la adeegsanayo weelal kala duwan | Fikirka iyo Sahaminta Sayniska | ST2. Baadh, in Ilmuhu si firfircoon u muujiya xiisaha uu u qabo naftiisa, dadka kale, iyo deegaanka ku xeeran. | ST2.4. Wuxuu bilaabaa inuu walxaha u adeegsado qalab ahaan |
| Dhallaan | | | | |
| Ilmaha Socod Baradka | | | | |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Dugsiga barbaarinta | | | | |

Tixgeli: Sidee ayaad hawlahan uga dhigi lahayd kuwo ka sii adag si ay ugu habboonaadaan carruurta da'da dugsiga?

## Adeegsiga Jaantuska KWL ee Qorshaynta

Jaantuskani wuxuu ka caawiyaa barayaasha inay diiwaangeliyaan oo ay si qoto dheer u fahmaan waxa carruurtu hore uga yaqaannaan mawduuc, waxa ay doonayaan inay ka ogaadaan, iyo inay ururiyaan oo ka fiirsadaan waxa carruurtu barteen marka daraasaddu dhammaato.

| K - Maxaad ka taqaanaa? | W - Maxaad doonaysaa inaad ogaato? | L - Maxaa soo baratay? |
|---|---|---|
| | | |

Fikradaha Waawayn:

### Kobcinta Barashada Carruurta Iyadoo la Adeegsanayo Goobaha Xiisaha

Sidee ayaad u horumarin kartaa deegaanka daryeelka carruurta qoyska si aad u sii taageerto korriinka iyo barashada carruurta? Qor laba yool oo lagu kobcinayo deegaanka waxbarashadaada.

- 
- 

## Milicsiga Ugu Dambeeya

- Waxa iigu muhiimsanaa ee aan ka bartay:
- Hal dhaqan ama fikrad aan qorshaynayo inaan toddobaadkan hirgeliyo:

## Dhaqan-gelinta Dhabta ah: Shaqada Goobta

U kuurgal carruurta marka ay ciyaarayaan oo ay sahaminayaan deegaanka. Qor wax ka mid ah waxyaabaha soo jiita xiisahooda. Adigoo adeegsanaya jaantuska KWL ee ku jira Hagaha Ka Qaybgalaha, carruurta weydii: “Maxaad ka taqaannaan mawduucan?” iyo “Maxaad la yaabban tihiin ama doonaysaan inaad ogaataan?” Kadib su’aal kasta, diiwaangeli jawaabahooda. Ka dib markaad ka fiirsato

jawaabahooda, aqoonso "fikradaha muhiimka ah" ee ku jira mawduucan. Kadib, isticmaal macluumaadka aad soo ururisay si aad u abuurto hawl lagu sii horumarinayo barashadooda.

# Guudmarka Qaybta 4aad

## Ujeedooyinka Waxbarashada:

Dhammaadka casharkan, ka-qaybgalayaasha si firfircoon uga qaybqaatay waxay awoodi doonaan inay:

- Muuji isdhexgal wanaagsan oo u dhexeeya dadka waaweyn iyo carruurta kaas oo taageeraya baahiyaha kala duwan ee carruurta ku jira barnaamijyada daryeelka carruurta qoyska.
- Kobci xiriir wanaagsan oo lala yeesho qoysaska iyadoo la adeegsanayo isgaarsiin wax ku ool ah, iskaashi, iyo ka qaybgalka qoysaska.

## Qorshaha Koorsada:

| Qaybta | Waqtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah |
|---|---|---|
| **A** | 15 daqiiqo | Soo Dhaweyn/Ujeeddooyin; Dib u Eegista Hawsha Goobta |
| **B** | 30 daqiiqo | Aasaaska Barashadu Waa Isdhexgalka Dadka Waaweyn iyo Carruurta |
| **C** | 30 daqiiqo | Taageeridda Barteyaasha Baahiyaha Kala Duwan |
| **D** | 30 daqiiqo | Taageeridda Manhajka Iyadoo loo Marayo Isgaarsiinta iyo Ka Qaybgalka Qoysaska |
| **E** | 15 daqiiqo | Soo Koobidda Koorsada |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | |

## Xeeladaha Waxbaridda ee Taageera Ilmo Kasta

Ka fiirso hababka aad hadda u isticmaasho waxbaridda. Sidee ayaad hadda carruurta ugu siinaysaa fursado kala duwan oo ay uga qaybqaataan waxbarashada oo ay ku muujiyaan waxa ay barteen? Mabda'a ee ayaad ku dareemaysaa inuu si weyn uga dhex muuqdo hab-dhaqankaaga? Aaggee ayaad u baahan tahay inaad sii horumariso?

| Soo bandhigidda macluumaadka iyadoo loo adeegsanayo habab kala duwan si loo fududeeyo fahamka | Bixinta xulashooyin ku saabsan habka carruurtu uga jawaabaan oo ay ku muujiyaan aqoontooda | Ka faa'iidaysiga danaha carruurta iyo taageeridda ka-qaybgalkooda |
|---|---|---|
| • Isticmaalka boombalooyin, sawirro ama agabyo kale | • Siinta carruurta habab kala duwan oo ay uga jawaabi karaan, sida inay | • Doorashooyin kala duwan oo ah hawlo ama xarumaha waxbarashada inta lagu jiro |

| | | |
|---|---|---|
| marka buug la akhrinayo ama sheeko la sheegayo.<br>• Isticmaalka walxo dhab ah, sawirro ama erayo muhiim ah si loo sahmiyo mawduuc ama arrin gaar ah, sida sawirrada beeraha iyo xayawaanka beeraha oo dhab ah, iyo codadka dhabta ah ee xayawaanka.<br>• Isticmaalka tilmaamaha jirka iyo luqadda calaamadaha marka la hadlayo, si loo xoojiyo luqadda iyo fahamka.<br>• Taageeridda kobcinta eray-bixinta carruurta baranaysa laba luqadood, iyadoo macnaha erayada lagu tusaaleeyo sheekooyin ay yaqaannaan, tilmaamo, walxo iyo sawirro ay carruurtu fahmi karaan.<br>• Muujinta xirfadaha iyadoo lala socodsiinayo tilmaamo afka ah, sida muujinta habka saxda ah ee gacmaha loo dhaqo iyadoo laga hadlayo tallaabooyinka la raacayo. | isticmaalaan tilmaamo, hadal, matalaad ficil ah ama sawir si ay u muujiyaan jawaabtooda.<br>• Ku dhiirrigelinta carruurta inay fikirkooda iyo dareenkooda ku muujiyaan farshaxan, sawirid ama wax-dhisid, halkii ay hadal ku sharxi lahaayeen ama ay ku dari lahaayeen sharaxaadda hadalka.<br>• Siinta carruurta qalabyo ku habboon baahiyahooda gaarka ah si ay u taageeraan horumarkooda iyo guushooda, sida maqasyo, qaadooyin, kuraas iyo looxyo isgaarsiineed oo si gaar ah loogu habeeyey.<br>• In la siiyo fursad doorasho oo wax soo saarka ah. Tusaale ahaan, haddii carruurtu baranayaan midabbada, midkood wuxuu walxaha u kala saari karaa midab ahaan, halka mid kalena uu midabayn karo ama rinjiyeyn karo. | ciyaarta gudaha iyo dibadda.<br>• U fiirsashada danaha carruur badan si deegaanka loogu daro alaab-ciyaareed, agab, muusig iyo buugaag ku habboon danahooda.<br>• Bixinta habab kala duwan oo lagu sahmiyo fikradaha laguna tababarto xirfadaha, sida shaqsi ahaan, laba-laba, kooxo yaryar iyo kooxo waaweyn.<br>• Tixgelinta baahiyaha dareemayaasha carruurta, sida in ilmaha ay buuqu ku adkaato loo siiyo sameecado dhegaha ah ama meelaha ka deggan oo uu wax ku barto.<br>• Isku xidhka isdhexgalka, waxbarashada iyo deegaanka nolosha guriga carruurta, iyadoo loo adeegsanayo heeso, sawirro, agab dhaqameed iyo habab kale oo lagu metelo nolosha guriga carruurta. |
| Fikrado ku saabsan waxyaabaha lagu darayo ama wax laga beddelayo: | | |

### Qiimaynta barnaamijka

Sidee ayay hab-dhaqannada barnaamijkiinnu u matalaan una taageeraan carruurta leh baahiyo iyo habab waxbarasho oo kala duwan?

- Deegaanka, hawlaha iyo waayo-aragnimada waxbarasho ma dhiirrigeliyaan waxbarasho firfircoon mise waxbarasho aan firfircoonayn?
- Ilmo kasta ma helaa fursad uu si bulsheed ula falgalo oo uu ula shaqeeyo barayaasha iyo carruurta kale?
- Nuxurka iyo agabku ma yihiin kuwo dhaqan ahaan macno leh oo ka tarjumaya carruurta ku jirta barnaamijka?
- Ma la xiriirtaa danaha carruurta oo ma ku dhisaysaa aqoontii ay hore u lahaayeen?

### Milicsiga Koorso

Qaado dhowr daqiiqo si aad uga fiirsato safarkii aan soo marnay ee ku aaddanaa hirgelinta manhaj macno leh ee barnaamijyada daryeelka carruurta ee qoysaska.

- Wadahadalladii ama hawlihii intii uu koorsadani socday kee ayaa sida ugu weyn maskaxdaada ugu soo dhacay? Maxay adiga kuu saameeyeen?
- Waa maxay isbeddellada aad samaysay, ama aad qorshaynayso inaad ku samayso, deegaankaaga, hab-dhaqannadaada, aragtidaada ama hawlahaaga, taas oo ka dhalatay koorsadan?
- Waa maxay natiijooyinka wanaagsan ee aad filayso inay ka dhashaan isbeddelladan?

## Fikradaha Ugu Dambeeya

Qor bayaan hawleed si uu u xoojiyo yoolalkaaga xirfadeed. Dhammaystir weedhan:

- Hal tallaabo oo aan ka go’an tahay inaan qaado natiijada koorsadan awgeed waa:
- Sababta uu yoolkani muhiim iigu yahay waa:

## Ilaha

- Tilmaamayaasha Horumarka Carruurnimada Hore (ECIPs)
- Xeerka Anshaxa iyo Bayaanka Ballanqaadka ee NAEYC
- Hagaha Luuqadda Loo Dhanyahay ee Ururka Cilmi-nafsiga Maraykanka
- Heerarka Tayada ee Ururka Qaranka ee Daryeelka Carruurta Qoysaska
- Help Me Grow
- Tilmaamayaasha Horumarka Carruurta ee CDC
- Naqshadaynta Caalamiga ah ee Waxbarashada: Liiska Hubinta Deegaannada Carruurnimada Hore

## Qiimeynta Tababarka

Dhowr maalmood gudahood, waxaad email ka heli doontaa Develop oo ku weydiinaya inaad dhammaystirto qiimayn tababar oo onlayn ah oo ku saabsan munaasabaddan, taas oo loo yaqaan Qalabka Qiimaynta Tababarka iyo Tababaraha (TTET). Runtii waan kaaga mahadcelineynaa taladaada ku saabsan waxqabadka tababaraha, macluumaadka ku jira iyo jawiga tababarka si aan u sameyno horumar inta aan ku guda jirno. Waxaan isticmaalnaa jawaab celintaada marka aan dib u eegno koorsooyinka oo aan jadwal u sameyno bandhigyada tababarka.